STANDARD RESPONSE PROTOCOL

## MACLUUMAADKA WAALIDIINTA & MAS’UULIYIINTA ARDAYDA

Iskuulkayaga wuxuu qaatay borotokoolka Heerka Waxqabadka Foundation-ka (SRP) ee "Waynu Idin Jecel nahay". Ardayda iyo shaqaaluhu waxay ku tababaran doonaan, ku-celcelin doonaan ooyna tilmaami doonaan u hoggaansamida borotokoolka.

## LUUQADDA  GUUD

Borotokoolka Heerka Waxqabadka (SRP) wuxuu ku saleysan yahay qaab si wadajir ah looga hortagayo halista marka loo eego xaaladaha gurmadka shakhsiga keliya. Sida Nidaamka Taliska Dhacdada (ICS) oo kale, SRP-gu wuxuu adeegsanayaa luuqad guud oo faseex ah isagoo oggolaanaya dabacsanaanta u hoggaansamida borotokoolka. Horudhaca waa uu sahlan yahay - waxaa jiraa shan tallaabo oo gaar ah oo la samayn karo xilliga dhacdada. Markii lagu dhawaaqayo ficilladan, ficilka waxaa lagu muujiyay "eray calaamad sawir ah" kadibna waxaa ku xiga "Tilmaam". Fulinta ficilka waxaa sameynaya ka-qaybqaatayal firfircoon, ooy ka mid yihiin ardayda, shaqaalaha, macalimiinta iyo gurmadayaasha koowaad. SRP wuxuu ku saleysan yahay tallaabooyinkan soo socda: Qabo, Ilaali Amniga, Xir, Ka Qax,iyo Gal Hoyga.

# QABO

**“Gudaha fasalkaaga ama Aaggaaga”**
**Ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Banneeyaan waddooyinka hoolka ooy ku nagaadaan aaggooda ama qolkooda ilaa lagaga dhawaaqayo“waa la wada banneeyay”
- U wata hawshiina sidii caadiga ahayd ee dadka waa-weyn

**Dadka waa-weyn & shaqaalaha** waxaa loo tababaray inay:

- Soo xiraan ooy quful albaabka
- Ka taxaddaraan ardayda iyo dadka waa-weyn
- U wata hawshiina sida caadiag ah

# ILAALI  AMNIGA

**“Gal Gudaha fasalkaaga. Soo xir albaabada dibadda ah.**
**Ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Ku laabtaan gudaha dhismaha
- U sii wataan hawshooda sida dadka waa-weyn ee caadiga ah

**Dadka waa-weyn & Ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Qof kasta ku soo xareeyaan guryaha
- Soo xiraan albaabada dibadda ah
- Kordhiyaan wacyigelinta xaaladaha
- Ka taxaddaraan ardayda & dadka waa-weyn
- Usii wataan hawshooda sidii hore

# XAROOSHADA

**“Waa la xirayaa, nalalkana    waa la waynayaa”**
**Ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Iska ilaaliyaan in la arko
- Joogteeyaan aamusnaanta
- Aynan furin albaabka

**Dadka waa-weyn & ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Ka soo wadaan ardayda marinka hoolka hadday suuragal tahay
- Qufulaan albaabka fasalka
- Demiyaan nalalka
- Ka fogaadaan in la arko
- Aamusaan
- Aynan furin albaabka
- U diyaargaroobaan inay baxsadaan ama is difaacaan

# U QAX

**“Meel”**
**Ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Ka tagaan alaabta haddii loo baahdo
- Keenaan taleefankooda hadday macquul tahay
- Raac tilmaamaha

**Dadka waa-weyn & ardayda** waxaa loo tababaray inay:

- Keenaan xaashiyaha duu-duuban & Boorsada gargaarka deg-degga (haddii aan lagu amrin inaynan waxba soo qaadanin iyadoo ay ku xiran tahay sababta loo qaxayo)
- Ku hoggaamiyaan ardayda tagista Goobta loo Qaxayo (Daadguraynta)
- Ka warqab ardayda iyo dadka waa-weyn
- Ka warbixi dhaawacyada ama dhibaatooyinka adoo adeegsanaya habka karaka cas/karaka caggaaran

# HOY

**“Istaraatijiyadda Halista & Badbaadada Gobolka ”**
**Khataraha** waxaa ka mid noqon kara:

- Duufaano
- Walxaha halista ah
- Dhul-gariir
- Sunaami

**Istaraatijiyadaha badbaadada** waxaa ka mid noqon kara:

- U qax aagga hoyga
- Quful qolka
- Dhig, dabool oo xaji
- Tag dhulka tagga ah

**Ardayda**  waxaa lagu tababaray:

- Istaraatijiyadaha habboon ee Halista iyo Badbaadada

**Dadka waa-weyn & Shaqaalaha** waxaa loo tababaray inay:

- Istaraatijiyadaha habboon ee Halista iyo Badbaadada
- Ka taxadaraan ardayda iyo dadka waa-weyn
- Ka warbixi dhaawacyada ama dhibaatooyinka adoo adeegsanaya habka karaka casaanka ah/kaarka caggaaran

STANDARD RESPONSE PROTOCOL

## HANUUNINTA WAALIDKA

Haddii ay dhacdo dacdo toos ah, waalidiinta waxay qabi karaan su’aalo ku saabsan kaalintooda.

# ILAALI AMNIGA

**“Gal gudaha. Soo xir albaabada dibadda ah”**

Sug amniga waxaa laga wadaa marka ay dibadda dhismaha ka jiraan arrimo halis ah.Ardayda & shaqaalaha ayaa la soo geliyaa albaabada dibadda ahna waa la xirayaa. Dugsiga wuxuu soo bandhigi karaa boor ay ku qoran tahay amniga dhismaha waa la sugay ee albaabada laga soo galo hortooda ama daaqadaha u dhow. Gudahana waxaa uu noqon doonaa, hawsha sidii caadiga ahayd ayay u soconaysaa.

## MA INAY WAALIDIINTU YIMAADAAN ISKUULKA MARKAY DHACDADA AMNI SUGISTA SOCOTO?




Malaha maya. Dadaal kasta ayaa la sameynayaa xilliga amni sugista lagu jiro si duruusta fasallada ay ugu sii socdaan sidii caadiga ahayd. Intaas waxaa sii dheer, waxaa waalidiinta laga codsanayaa inay dibadda ka joogaan xilliga amni sugista lagu jiro

## KA WARAN HADDAY WAALIDIINTU U BAAHAN YIHIIN INAY SOO QAADAAN ARDAYDOODA?

Iyadoo ku xiran xaaladda jirta, waxaa dhici karta inay ammaan ahayn in la siidaayo ardayda. Markay xaaladdu isbeddesho, Sugidda ammaanku wuxuu isku beddeli karaa ‘Soo-gelitaan la kormeerayo iyo/ama ‘’siideyn xakamaysan’’.

## WAALIDIINTU MA LA OGEYSIINAYAA MARKA DUGSIGU BILAABO AMNI SUGISTA?

Marka dhacdo amni sugid ay tahay wax kooban ama halistu tahay mid aan rabshad lahayn sida xayawaanka duur-joogta oo ku sugan garoonka cayaarta, ma loo baahna in la ogeysiiyo waalidiinta xilliga amni sugidda lagu guda jiro.
Dhacdooyinka ka khatarsan, dugsigu waa inuu ogeysiiyaa waalidiinta in dugsigu kordhiyay sugidda amnigooda.

# XAROOSHADA

**“Waa la xirayaa albaabada, nalalkana waa la waynayaa”**

Xarooshada waxaa loogu yeeraa maka ay jiraan wax halis Ku ah gudaha dhismaha. Ardayda & shaqaalaha waxaa loo tababaray inay galaan ama ay ku noqdaan qol la xiri karo ayna aamusnaadaan.

Xarooshada waxaa la soo rogaa oo kaliya marka halis  markaa taaggan ee gudaha ama meel aad ugu dhow dhismaha ay jirto.

© Xuquuqda nuqulka 2009-2020, Xuquuqda oo idil  xafidan. Foundation-ka  ee “Waynu Idin Jeceln
iyo Loogada waa Sumadda ee Foundation-ka  ee “Waynu Idin Jecelnahay” waxaana laga diiwaang
laga bixin karaa nuqullo badan si loo qaybiiyo iyadoo loo eegayo“Shuruudaha  Adeegsiga ee SRP”
eegay: 04/21/2020 | http://iloveuguys.org

## MA INAY WAALIDIINTU YIMAADAAN DUGSIGA XILLIGA LA XAROONAYO?

Rabitaanka dabiiciga ah ee waalidiinta ayaa ah inay aadaan iskuulka xilliga la xaroonayo. Waa sax, laakiin waxaa dhici karta inay dhibaato tahay. Haddii ay khatar gudaha dhismaha ka jirto, sharci fulinta ayaa u gurman doonaa. Uma badna in waalidiinta loo oggolaan doono gelitaanka dhismaha ama cumpus-ka. Hadday waalidiintu ku sugan yihiin iskuulka waxaa la amri doonaa inay sidoo kale xaroodaan

## MA INAY WAALIDIINTU FARIIN QORAAL USOO DIRAAN ARDAYDOODA?

Dugsigu wuxuu ayidsan yahay muhiimadda wada xiriirka ka dhaxeeya waalidiinta iyo ardayda xilliga lagu jiro dhacdada  xarooshada. Laakiin waalidiintu waa inay ka warqabaan inta lagu jiro muddada bilowga ah ee xarooshada, waxaa laga yaabaa inaysan ammaan ahayn in ardaydu fariin qoraal u soo diraan waalidiintooda. Marka xaaladdu degto, waxaa dhici karta in ardayda laga codsado inay waalidiintu si joogta ah ugu wargeliyaan meesha xaaladoodu marayso.
Xaaladaha qaarkood, ardayda waxaa laga yaabaa in la daadgureeyo oo la geeyo meel ka baxsan goobta si ardayga iyo waalidka dib ugu midoobaan

## KA WARAN TILMAAMIDDA AAN LA SHAACIN?




Iskuulku wuxuu sameyn karaa tilmaamidda aan la sii qorsheynin, haseyeeshe lama dhiiragelinayo in la sameeyo mid iyada oo aan lagu ogeysiin in ay tahay tilmaamid. Taasi waxaa loogu yeeraa tilmaamidda aan la shaacin waxayna sababi kartaa welwel iyo walaac aan loo baahnayn.
Waalidiintu waa inay gartaan in dugsigu had iyo jeer ku wargelin doono ardayda inay tahay tilmaamidda inta lagu guda jiro bilowga ogeysiiska.
Waa muhiim in la kala saaro drill-ka iyo layliga. Drill-ku waxaa loo isticmaalaa in laguabuuro "Xusuusta Muruqa" ooy la socota ficil lagu tababaray. Ma jiro jilitaan dhacdo ah; tani waa un sahlan u qabashada ficilka. Layli wuxuu matalayaa dhacdo dhab ah oo lagu tijaabinayo awoodda shaqaalaha iyo qalabka.

## WAALIDIINTU MA U-KUURGELI KARAAN AMA MA KA-QAYBGELI KARAAN TILMAAMIDDA?

Dugsigu  wuxuu soo dhawaynaya waalidiinta doonaya inay u-kuurgalaan ama ka-qaybqaataan tilmaamidda.